FAAFINTA RASMIGA

الجريدة الرسمية

DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA
لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 19-aad. Garowe .19/8/2017. Lam.8.

Faafintabilwalbasoobaxda جريدة الشهرية

*QaybtFaafintaRasmiga ah eeMadaxtooyadaDawladda Puntland*

---

Qiimuhu waaSh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waaSh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisaSh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaanF.Rhalkiisadariyowixii ka yar waaSh.So 3,000, rukunkaiyo qoritaankawaxaa la waydiistaa qeybta maamulkaFaafinta rasmiga ah. Lacagtawaxaalagubixinayaa xafiiskacanshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

---

**TUSMADA**

**QaybtaKoowaad**
**Ansixinta Xeerka xirfadlayaasha caafimaadka dawladda puntland.**

**Qaybta labaad**
**Xeer**
**Waxba ma leh**
**Qeybta Saddexaad**

**Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.**
**Waxba ma leh**

*Xeer LR .4. ee 19/8/2017, kuna saabsan ansixinta Xeerka xirfadlayaasha caafimaadka dawladda puntland.*

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

ولاية بونت لاند الصومالية

PUNTLAND STATE OF SOMALIA

Xeerka Lr.4. ee20/8/2017, kuna saabsan ansixintaXeerka xirfadlayaasha caafimaadka dawladda puntland.

Madaxweynuhu,

Markuu arkay: DastuurkaDawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

Markuu arkay: AnsixintaGolahaWakiilada Puntland eeSummad XGGW/DPLS/85/2017 Garowe,Talaada. Date:15/o8/2017;

Markuu tixgeliyey:Muhiimadda xeerkani u leeyahayDawladda Puntland.

## Wuxuu soo saaray

Xeerkan soo socda:

### Qodobka 1-aad

GolahaWakiiladu waxay ansixiyeenXeerka xirfalayaasha caafimaadka dawladda puntland

### Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa XafiiskaMadaxweynaha, XafiiskaXoghayahaGuud ee Baarlamaanka iyoXafiiskaGaryaqaankaGuud ee DPL.

### Qodobka 3-aad

DhaqangalkaXeerkani wuxuu noqonayaa marka Madaxweynuhu saxiixo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee DawladdaPuntland..

**Prof Cabdiweli maxamad Cali Gaas.**
**Madaxweynaha Dawladda puntland.**

DAWLADDA PUNTLAND

EE SOOMAALIYA

GOLAHA WAKIILADA

ولاية بو نت لاند الصومال

مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha

Office of the Speaker

---

*Ref:*-XGGW/DPL/ 85 / 2017 Garoowe, Talaada Date:- 15/ 08 /2017

**Ku:- Madaxweynaha DPL** **Garoowe**

Ujeeddo:- Ansixinta Xeerka Xirfadlayaasha Caafimaadka Dawladda Puntland.

Guddoomiyaha Golaha Wakiilladu:-

MARKUU ARKAY: Dastuurka DPL Qodobka 64-aad Faqrada 1-aad.

MARKUU ARKAY: Soo gudbinta Madaxweynaha ee Ref: - **MW/DPS/465/2017 ee August, 06/2017,** kuna saabsan Ansixin Xeer Xirfadlayaasha Caafimaadka.

MARKUU DHEGEYSTAY: Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu ku ansixiyey Kalfadhigii 39-aad fadhigiisii 19-aad ee 06/08/2017. Xeerka Xirfadlayaasha Caafimaadka ee Dawladda Puntland.

Wuxuu Guddoomiyey:

Ansixinta Xeerka Xirfadlayaasha Caafimaadka Dawladda Puntland.

Allaa Mahad Leh

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada
Speaker of the House of Representatives
PUNTLAND STATE

Md. Axmed Cali Xaashi

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.

DAWLADDA PUNTLAND

EE SOMALIYA

PUNTLAND STATE OF SOMALIA

# DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA
# WASARAADDA CAAFIMAADKA

## XEERKA GUDDIGA XIRFADLAYAASHA CAAFIMAADKA PUNTLAND

August. 2017

## *Qodobka 1-aad*

## *ERAY-BIXINTA*

1. **Guddiga:** waxaa loola jeedaa guddiga loo xilsaaray diiwaangelinta, anshaxmarinta, tayaynta xirfadlayaasha caafimaadka iyo qiimaynta, kormeerida, ka warbixinta ruqsad-siinta goobaha adeega caafimaadka iyo daawooyinka.
2. **Dakhtar:** Waxa loola jeedaa qof kasta oo leh aqoon heer jaamacadeed oo ku saabsan caafimaadka, daawada iwm oo uu guddigu aqbalay, (qofkasta oo haysta shahaado jamacadeed oo dhakhtarnimo MBBS ).
3. **Kalkaaliye:**Waxaa loola jeedaa qof kasta oo ka haysta shahaado machad tababar adeeg caafimaad oo la aqoonsan yahay ama waayo-aragnimo dheer oo guddigu aqbalay marka uu qiimeeyay.
4. **Xirfadle:** waxaa loola jeedaa qof kasta oo aqoon u leh adeegyada caafimaadka dadka, daawoyinka, shaybaarka, raajada iyo wixii kale oo la xiriira caafimaadka iyo fayo-dhowrka ee uu guddigu aqoonsaday.
5. **Farsmo-yaqaan**: Waxaa loola jeeda qof kasta oo loo tababaray adeeg caafimaad oo gaar ah sida shaybaar, raajada, nafaqeynta, iwm oo guddigu aqoonsaday.
6. **Goob caafimaad:** Waxaa loola jeeda meel kasta oo lagu fuliyo adeeg caafimaad; sida daaweyn, qalliin, shaybaaris, Isbitaal, Bukaan-socod, ummulin, La talin, IWM.
7. **Isbitaal:** Waxa loola jeeda goob kasta oo lagu daaweeyo bukaan-jiif nooc ama noocyo cudurada jirka ama maskaxda ka mid ah oo guddiga ruqsad ka haysta.
8. **Farmashi:** Waxaa loola jeeda meel kasta oo ku hawlan saamaynta, iibinta (Jumlo iyo Tafaariiq), kaydinta, IWM ee daawada.

## QODOBKA 2-aad

### Qeexidda guddiga xirfadlayaasha caafimaadka puntland .

Guddiga xirfadlayaasha caafimaadka dawladda Puntland waa guddi dawli ah, oo qaabilsan hubinta , Ruqsad-siinta, diiwaangalinta , kormeerka , tayaynta , dhawrista iyo ilaalinta xushmadda xirfadda caafimaadka dhulka dawladda Puntland ee Soomaaliyeed. Guddigu wuxuu Hoostagaa Wasaaradda Caafimaadka.

## QODOBKA 3-aad

### QAAB DHISMEEDKA GUDDIGA

1. Guddiga xirfadlayaasha Caafimaadka Puntland wuxuu yeelanayaa Guddi heer Puntland iyo guddiyo heer gobol iyo La taliye Sharci yaqaan.
2. Guddiga Wuxuu xilka haynayaa 4 sano oo ka bilaabta maalinta ay xilka la wareegaan.

## QODOBKA 4-aad
## GUDDIGA HEER PUNTLAND

Guddiga Caafimaadka ee Heer Puntland wuxuu ka kooban yahay

1. 3 xubnood oo matala dhakhaatiirta Puntland.
2. 2 xubnood oo midiba matasho kalkaaliyaasha iyo umulisooyinka Puntland.
3. Xubin ka mid ah daneeyayasha caafimaadka ee gaarka ah (private sector}.
4. Xubin matasha farsamayaaqannada caafimaadka (shaybar, Rajo ,iwm).
5. Agaasime waaxeed matalaya waaxyaha wasaaradda caafimaadka.
6. Guddoomiyaha Guddiga waxaa iska dhex dooranaya Guddiga, wuxuuna noqonayaa dhakhtar khibrad badan leh oon Dawladda u shaqayn.
7. Guddigu wuxuu yeelanyaa La taliye xagga sharciga.

## QODOBKA 5-aad

## GUDDIGA HEER GOBOL

Guddiga caafimaadka ee heer gobol wuxuu ka koobnaan doona:

1. Agaasimaha cusbitaalka guud ee gobolka (Guddoomiye)
2. Saddex xubnood oo kala metela xirfadaha dhakhtar, kalkaaliye iyo farsamayaqaan caafimaad .
3. Xubin ka mid ah Daneeyayaasha caafimaadka gaarka ah
4. Xubin ka mid ah ururka farmashiyayaasha.

## QODOBKA 6-aad

## XILKA GUUD EE GUDDIGA XIRFADLAYAASHA CAAFIMAADKA PUNTLAND

1. Diiwaangelinta Xirfadlayaasha iyo goobaha caafimaad mid dawaladeed iyo mid gaar ahaaneedba.
2. Aqoonsiga Xarumaha barashada Xirfadaha Caafimaad iyo hubinta tayada adeega caafimaad ay bixiyaan.
3. Dabagalka kormeerka iyo qiimaynta hawl-wadeenka iyo goobaha caafimaadka.
4. Horumarinta tayada caafimaadka, sida tababarrada, dhiirigelinta iyo cilmi baarista.
5. Kala shaqaynta Wasaaradda Caafimaadka soo saarista liiska dawooyinka waddanka lagu isticmaali karo iyo Hubinta isticmaalkooda saxda ah.
6. Go'aan ka gaarista cabashooyinka laga keeno xirfadlayda iyo goobaha caafimaadka iyo anshax marintooda.

## QOBODBKA 7-aad

## XILKA GUDDIGA HEER DAWLADD Puntland

1. Kadyinta diiwaannada guud ee xirfadlayaasha iyo goobaha caafimaad.
2. Ansixinta kama dambysta ah ee diiwaannada xirfadlayaasha iyo goobaha caafimaad.

3. Go'aan ka gaarista iyo anshax marinta dacwadaha ka soo gudba guddigayada gobollada.
4. Diyaarinta dhamaan xeerarka caafimaadka xirfadaha & goobaha Caafimaadka.
5. Hubinta, dabagalka iyo kormeeridda aqoonta xirfadlayaasha goobaha iyo adeega caafimaadka.
6. La talinta wasaaradda caafimaadka arimaha xirfadaha iyo xirfadlayda caafimaadka.
7. Horumarinta tayada caafimaadka sida tababarada, dhiirigelinta, cilmi-baarista iwm.
8. La xiriiridda guddiyada la mid ka ah ee caalamka ka jira.
9. Guddigu wuxuu ku xirmaa wasaaradda caafimaadka.
10. La socodka dawooyinka dalka soo gala iyo tala siinta wasaaradda ka joojinta dalka daawooyinka aan bulashada ku haboonayn.
11. Anshax-marinta xirfadlayda iyo goobaha caafimaadka oo laga dacwooday ama ay ku ogaadaan baaritaan ka dib.
12. Tala Ka bixinta xirfadlayaasha iyo xirfadaha caafimaad ee waddanka ka jira iyo sidoo kale goobaha caafimaad.

## QODOBKA 8-aad

## XILKA GUDDIGA HEER GOBOL

1. Diiwaangelin iyo bixin ruqsadaha ku meel-gaarka ah ee heer gobol.
2. Kaydinta nuqullo diiwaannada xirfadlayaasha caafimaad ee heer gobol.
3. Hubinta, dabagalka iyo kormeeridda aqoonta xirfadlayaasha, goobaha iyo adeegyada caafimaad ee heer gobol.
4. Anshax –marinta xirfadlayaasha iyo goobaha caafimaadka ee heer gobol.
5. La socodka dawooyinka ka soo galaya waddanka gobolkaasi.
6. U gudbinta guddiga dhexe ee Xirfadlaayasha Caafimaadka dawladda Puntland si joogta ah diiwaannada Xirfadlayaasha iyo goobaha caafimaadka gobolka .
7. Fulinta go'aamada iyo farriimaha ka soo baxa guddiga dhexe.

## QODOBKA 9-aad
## SHAQAALAHA GUDDIYADA HEER PUNTLAND IYO KUWO HEER GOBOL

1. Guddigu wuxuu hawl-gelin karaa shaqaale intii uu u baahdo, mid jooogto ah iyo mid ku meel gaar ah ba.
2. Guddigu wuxuu bixiyaa shahaado hawl karnimo ciddii mutaysata.

## QODOBKA 10-aad

## DIIWAAN-GELINTA XIRFADLAYAASHA CAAFIMAADKA

1. Guddigu waa inuu diyaariyaa, hayaa, habeeyaa diiwaanada kala duwan ee hawl-wadeenada iyo goobaha caafimaadka ee kala ah:-
   a) Diiwaanka Dhakhtarka Guud.
   b) Diiwanka Dhakhaatiirta ilkaha.

c) Diiwaanka dadka sameeya qalabka indhaha, kuwa indhaha cabira iyo kuwa bixiya ama iibiya qalabka indhaha.
d) Diiwaanka kalkaaliyaasha iyo umulisooyinka.
e) Diiwaanka fayo- dhawrayaasha.
f) Diwaanka Farmishistayaasha.
g) Diiwaanka daryeelaha caafimaadka goobaha shaqada.
h) Diiwaanka farsama-yaqaannada raajada.
i) Diiwaanka farsama-yaqaannada sheybaarka caafimadka.
j) Diiwaanka daryeelaha ilkaha.
k) Diiwaanka sarkaal caafimaad.
l) Diiwaanka farsamayaqaannada ilkaha.
m) Diiwaanka farsama-yaqaannada caafimaadka degaanka.
n) Diiwaanka gacan- yarayaasha raajada
o) Diiwaanka ruqsadle caafimaad.
p) Diiwaanka daryeele lafaha iyo muruqyada(physiotherapist)
q) Diiwaanka saraakiisha sayniska qalabka caafimaadka.
r) Diiwaanka saraakiisha xannaanada degdega ah (Paramedics)
s) Diiwaanka farsama-yaqaannada qalliinka iyo kabka lafaha (OT Technicians).
t) Diiwaanka farsama-yaqaannada nafaqeynta iyo cuntada.
u) Diiwaanka farsama-yaqaannada maqalka cabira.
v) Diiwanka cilmi-nafsi-yahanka caafimaad.
w) Diiwaanka daryeele nadaafadda afka ah.
x) Diiwaanka Farsamoyaqaannada Suuxinta.
y) Diiwaanka Goobaha caafimaadka(sida Isbitaal, Rug, Farmashi, shaybaar, Raajo, iwm) oo gaarka loo leeyahay.
z) iyo ciddii kale ee hawl caafimaad ku hawlan.

2. Guddigu waa inuu diyaariyaa, habeeyaa, hayaa ama kaydiyaa diiwaannada isu-diyaarinta, ku-meel-gaadhka, kuwa buuxa iyo takhasuska.
3. Diiwaannadaaas waa inay ku qornaadaan magaca, cinwaanka, caddeynta xirfaddiisa iyo faahfaahinta kale ee qofka la xidhiidha taas oo uu qeexi doono guddigu.
4. Qof kasta oo xeerkan lagu diiwaan-geliyey haddii uu isbeddel ku yimaado cinwaankiisa waa inuu iska xaadiriyaa xafiiska diiwaan-hayaha muddo bil gudaheed.

## QODOBKA 11-aad
## XEER-HOOSAADYADA QEEXAYA NOOCYADA XIRFADEED EE AASAASIGA AH

1. Guddigu wuxuu soo saarayaa xeer-hoosaad qeexaya shahaado, Diblooma ama caddeyn (Certificate) oo ahaan doona sugaha noocyada xirfadeed ee aasaasiga ah, si loogu diiwaan geliyo noocyada kala duwan ee diiwaanada.

2. Guddigu wuxuu Xeer hoosaadka ku qeexayaa shuruudaha laga rabo xirfadaha ku xusan qodobka 10-aad.

## QODOBKA 12-aad

### Diiwaangelinta ku meel gaarka ah

1. **Diiwaan-gelinta isu diyaarin xirfadle**: xirfadlaha hadda soo qalin-jabiyey ee sita shahaado, Diblooma ama Caddeyn (certificate) ee ka soo qaatey jaamacadaha Puntland ama kulliyad machad guddigu aqbalsan yahay waxa lagu diiwaan-gelinayaa diiwaanka isu-diyaarinta xirfadle.
2. **Diiwaan-gelinta ku meel gaar ka ah**: xirfadlaha ka soo qalin jebiyey jaamacad dibedda ama kulliyad ama machad Guddigu aqbalsan yahay kana soo shaqeeyay rug caafimad oo taya leh oo dibedda ah ugu yaraan 12 bilood caddayna ka soo qaatey, waxa lagu diiwaan-gelinayaa diiwaanka ku meel gaaarka ah inta guddigu ku qancayo caddeymihiisa.

## QODOBKA 13-aad

### DIIWAAN-GELINTA BUUXDA

1. Xirfadle lagu diiwaan-geliyey diiwaanka isu-diyaarinta xirfadle ama ku meel gaar waxaa lagu diiwaangelin doonaa diiwaanka hawl-wadeen caafimaad oo buuxa, haddii uu la shaqeeyay muddo aan ka yareyn 12 bilood cusbitaal ama rug caafimaad oo Guddigu aqbalsan yahay, kana soo qaatey caddeyn sarkaalkii u sareeyay, guddiguna ku qancay.
2. Waxa lagu diiwaan-gelinayaa diiwaanka xirfadle-buuxa, xirfadle kasta oo haysta shahaado la aqoonsaday, kana soo shaqeeyay adeeg caafimaad ugu yaraan 12 bilood guddiguna ku qancay.
3. Waxa lagu diiwaan-gelinayaa diiwaanka buuxa xirfadle kasta oo leh waayo-aragnimo caafimaad haddii guddigu ku qanco ama imtixaan ka qaado ama tababaro ama qiimeeyo sidaana ku aqbalo.
4. Diiwaan-gelinta takhasuska: Xirfadle kasta oo sita shahaado sare oo guddigu aqbalay waxa lagu diiwaan-gelinayaa diiwan u gaar ah oo qeexaya takhasuska qofka marka guddigu ansixiyo.

## QODOBKA 14-aad

### RUQSAD HAWL-WADEEN CAAFIMAAD IYO WAXBARASHO

1. Qofkii xeerkan lagu diiwaan geliyo waxa la siin doonaa ruqsad uu ku shaqeysto.
2. Guddigu wuxuu xeer-hoosaad ku qeexidoonaa bixinta rukhsadaha iyo muddooyinkooda.
3. Guddigu wuxuu tixgelinayaa arrimaha la xiriira tababarrada xirfadeed, farsamo iyo Shahaadada kale ee looga baahan yahay gelidda xirfaddaa dabaqad kasta ha ahaate.
4. Wasiirku wuxuu kormeeri karaa goob kasta oo ku hawlan hawl caafimaad. Waa waajib cid kasta iyo goob kasta oo ku hawlan adeeg caafimaad inay guddiga ka haysato ruqsad.

## QODOBKA 15-aad

### DIIWAAN-GELINTA GOOBAHA CAAFIMAADKA

1. Diiwaan-gelinta Cisbitaalada, goob adeeg caafimaad (Clinic or consulting room), Farmashi, Sheybaar, raajo, guryo lagu xannaneeyo dadka buka ama wayeelka ah, meelaha baarista cudurradda, adeegyada kale ee dhinaca daaweynta.
2. Qofku wuxuu codsi u soo qoranayaaa guddiga si loogu sameeyo diiwan-gelinta arrimaha adeeg caafimaad ama goobahaha baarista cudurrada ama Cisbitaal ama farmasi.
3. Codsiga xubinta kore ku xusan wuxuu ka koobnaan doonaa magaca qofka leh goobta caafimaad ee la furayo iyo qof shaqaale ah ee la aqoonsan yahay.
4. Guddigu ma ogalaanayo goob adeeg caafimaad nooc ay tahayba, haddii: Mulkiilaha goobta ama maamuluhu aanu uqalmin shaqada.

   b. Aan degaanku (premises) u qalmin adeega loogu talo galay.
   t. Dhismaha, qalabka ama alaabta iyo shaqaalaha kale aanu u qalmin adeega loogu talagalay.
   j. Qofka codsiga samaynayaa ama masuulka ka ihi aanu ku jirin diiwaan-gelinta buuxda.
   x. Qofka maamulaha ah ee aan la helayn ama aanu joogin waqtiyada uu guddigu u qoondeeyey shaqada.
5. Goobta caafimaad waxay bixin kartaa oo kaliya adeega caafimaad ee ruqsadda loo siiyay oo kaliya , haddii ay kordhinayso ama dhimayso heerka adeega caafimaad waa in guddigu Rukhsad u siiyaa arrintaas.

## QODOBKA 16-aad

### BIXINTA SHAHAADADA DIIWAAN GELINTA GOOBTA

Guddigu wuxuu siin doonaa shahaadada diiwan-gelinta goob kasta oo adeeg caafimaad bixisa Iyadoo qaabkeeda iyo muddadeeda Guddigu xeer-hoosaad ku soo saari doono.

## QODOBKA 17-aad

### BIXINTA RUQSADDA DIIWAAN-GELINTA

### GOOB CAAFIMAAD QOF AJNABI AH

1. Xirfad-yaqaan caafimaad ee ajnabi ah ee soo codsada ruqsadda diiwaan-gelinta cisbitaal, goob adeeg caafimaad, goob baarista cudurada, waa inuu ku xirnaa cisbitaal ama adeeg caafimaad oo uu aqoonsan yahay guddigu lixbilood ka hor inta uusan codsiga ruqsadda diiwaan-gelinta soo qoran.
2. Xirfad- yaqaanka ajnabiga ahi waa inuu haysto shahaado u suurta gelinaysa in lagu diiwaan-geliyo diiwaanka ku haboon.

## QODOBKA 18-aad

### GOOBAHA CAAFIMAAD EE MIYIGA & TUULOOYINKA

Diiwaanka Xirfadlaha samaysta goob adeeg caafimaad meel miyi ama tuulo ah wuxuu bixin doonaa lacagta diiwan-gelinta oo ka yar inta magaalooyinka laga qaadayo waxaana goynaya guddiga.

## QODOBKA 19-aad

### KU DAAWEYNTA TALO-CAAFIMAAD

1. Talo caafimaad, daawayn, cudur sheegid lama bixin karo ama cidna lagama siin karo goob adeeg caafimaad, goob baaris cudurrada ama cisbitaal, Waxa bixin kara oo keliya dhakhtarka si shaqsi ah ama amarkiisa.
2. Rug caafimaaf oo aan dhakhtar daawa qora suuragal u ahayn (sida Tuulooyin ama Degmooyin fog ), waxaa daawada Bixin kara Sarkaal Caafimaad (Clinical Officer) amd Kalkaaliye sare.

## QODOBKA 20aad

### XEER-HOOSAADYADA DIIWAAN GELINTA GOOBAHA

1. Guddigu wuxuu diyaarinayaa xeer hoosaadyo lagu qiyaasi karo aqoonta iyo waaya aragnimada xirfad yaqaanka caafimaad, goobta baarista cudurrada iyo Isbitaallada.
2. Guddigu wuxuu diyaarinayaa xeer-hoosaadyada diiwaan gelinta dhammaan goobaha adeegga caafimad sida Isbitaalada, sheybaarrada iwm.

## QODOBKA 21-aad

### GUDDI HOOSAADKA ANSHAXA

1. Guddiga Xirfadlayaashu wuxuu yeelanaya Guddi hoosaad Anshaxa.
2. Guddi-hoosaadka anshaxu waxay talo ka bixin karaan dib u tababarrida xirfadlayda muddo cayiman iyo aqoon cayiman oo lagu qabto meel ay cayimeen.
3. Haddii qof diiwaan-gashan ka dib marka baaritaan lagu sameeyo ay ogaadaan inuu yahay qof aan dhammayn (xiskiisu dhimman yahay) xaga maskaxda ama xagga jirka, oo loo arko in qofkaas oo hawsha sii wada ay dhaawac ama dhib ku keeni karto danta guud ee ummadda, Guddiga anshaxu waxay gaarayaan go'aan shaqo ka joojin intaan magaciisa laga tirtirin diiwaanka.

## QODOBKA 22-aad

### KA TIRTIRIDDA DIIWAANKA

1. Guddiga Xirfadlayaasha Caafimaadku wuu ka tirtirayaa diiwaanka qofkii diiwaan-gashan ee maxkamad ku xukuntay xukun ciqaabeed (danbi culus ama

anshax xumo) oo gaarsiisan xarig 5bilood ama ganaax lacageed “mooraal” xumo ah.

2. Qofkii Guddigu ku helo inuu sameeyey dambi dhaqan (anshax) xumo xirfadeed.
3. Qofka laga tirtiray diiwaanka haddii goob caafimaad magaciisa lagu diiwaaan geliyey, goobtaasi magaciisa kuma sii shaqeyn karto.

## QODOBKA 23-aad

### CIQAAB MAXKAMADEED

Qof kasta oo:

1. Si ula kac ah u been abuurta magac ama cinwaan si uu ugu shaqaysto xirfad caafimaad uusan lahayn.
2. Goob aan diiwaan-gashanayn ama sharcigani u saamaxayn ku hawl galka Xirfadle caafimaad (dhakhtarnimo ama kalkaaliye IWM ).
3. Si ulakaca oo been abuura isu diiwaan geliya ama damcaba inuu isu diiwan geliyo, qodob kale oo sharcigani qeexayo, wuxuu galayaa dambi waxaana u qaadayaa xeerka ciqaabta qodobada warqadaha been abuurka ah.
4. Waxa Guddigu ku oogayaa dacwad maxkamadeed, wixii dhaafsan anshaxa-marinta, cid kasta oo gef ku gasha adeegga caafimaad .
5. Go’aannada Guddiga ciddii ku qanci weyda, waxaa racfaan looga qaadan karaa Hay’adda garsoorka.

## QODOBKA 24-aad

### XIRIIRKA SHAQO EE GUDDIGA XIRFADLAYAASHA CAAFIMAADKA IYO WASAARADDA CAAFIMAADKA

1. Guddiga iyo Wasaaraddu shatiga xirfadlaha way isla saxiixayaan.
2. Guddigu Warbixin ayuu la wadaagayaa wasiirka.
3. Guddigu go’aammada u soo saaro wasaaraddu wixii kaga aaddan fulintooda qayb ayey ka qaadanaysaa.
4. Guddigu wuxuu talo ka siinayaa Wasiirka horumarinta Caafimaadka dalka.
5. Wasaaraddu waxay kormeeri kartaa Goob kasta oo hawl caafimaad ka socoto.

### ARRIMAHA MAALIYADDA

## QODOBKA 25-aad

### DHAQAALAHA GUDDIGA

1. Dakhliga Gudiigu wuxuu ka koobnaan doonaa.
   b. Miisaaniyadda si sharci ah loogu qoondeeyay inay hawshooda ku fuliyaan.
   t. lacagaha Guddiga lasiiyo, sida deeq, yabooh. khidmo, iwm.
   j. Maalgelin iyo kobcin munaasib ah.
2. Guddiga waxa u bannaan oo uu suurta gelin karaa:-
   b. Inuu ka guddoomo lacag deeq ah cid kasta oo Puntland ka mid ah ama ka baxsan oo ay ubaahdaan si ay u filiyaan hawshooda.

3. Ayadoo waafaqsan amarrada lagu soo saaray sharcigan, in la ururiyo, lana xisaabiyo kharashka/dakhliga uu Guddigu qabato/isticmaalo.
4. Waxa lagu bixinayaa dakhliga uu Guddigu helo arimahaan.
    b) Mushaharooyinka gunnooyinka ay qaataan shaqaalaha Guddigu iyo amaahda.
    t) Kharashyada caqligalka ah ee gaadiidka safarka iyo gunnooyinka safarka ee xubnaha Guddiga marka ay gudanayaan hawlaha ay u xilsaaran yihiin, ayadoo kharashaakaas lagu bixinayo xeer-hoosaadka Guddiga u yaala.
    j) Wixii kale ee kharash ah ee Guddigu galo ayaga oo ku jira hawlaha la xidhiidha xilkooda.
5. Maaliyadda Guddigu hesho waxaa lagu maamulayaa hab-xisaabeedka dalka u yaal.
6. Qoondada Khidmada ee ku aadeysa Guddiga Heer Puntland iyo Heer Gobol waxaa Ka wada hadlaya Wasaaradda Caafimaadda iyo wasaaradda Maaliyadda.

## Qodobka 26-aad

### Khidmada ku waajibta Shaqooyinka Gaar ahaaneed ee Guddiga iyo Wasaaraddu Ruqsad siiyaan,

Kaddib markay Wasaaradda Caafimaadku la tashatay , Wasaaradda Maaliyadda iyo Wasaaradda Ganacsiga waxay go'aamisey in Ruqsadaha uu Guddigu ogolaado Wasaaradda Caafimaadkuna aqbasho laga qaado khidmado sannadle ah ee ku cad shaxda hoos ku qoran:

| Lr | NOOCA RUQSADDA | KHIDMADA SANNADLAHA EE KU WAAJIBTEY (US DOLLAR) |
|---|---|---|
| 1 | Farmasiyaha gaar ahaaneed Heerka: A (JUMLO) | $250.00 |
| 2 | Farmasiyaha gaar ahaaneed Heerka: B (Tafaariiq) | $150.00 |
| 3 | Farmasiyaha gaar ahaaneed Heerka:C | $100.00 |
| 4 | Rug Takhaatiir heer (Polyclinic) uu leeyahay Muwaadin Somali ah | $250.00 |
| 5 | Rug Takhatr Keliya | $100.00 |
| 6 | Isbitaal Gaar ahaaneed | $300.00 |
| 7 | Rug Takhtar Ajnebi ah | $1000.00 |
| 8 | Rug Ummuliso gaar ahaaneed | $100.00 |
| 9 | Rug Shaybaar gaar aheeneed | $100.00 |
| 10 | Rug Raajo (X-ray) Gaar ahaaneed | $100.00 |
| 11 | Shirkadda Codsata in ay daawo ama qalab caafimaad oo ganacsi ah soo dejiso | $500.00 |
| 12 | Rug ilkaha (dentiste) oo gaar ahaaneed | $100.00 |
| 13 | Rug indhaha oo gaar ahaaneed | $100.00 |

## Qodobka 27-aad

### Mamnuucidda Waxayaalaha halista ku ah caafimaadka Buslshada

Waxaa la mamnucay/raabay:-

1. In dalka la soo geliyo daawooyin dhacay, kuwo aan tayo lahayn iyo dhamman daawo u ekaha sida kuwa lagu caddeeyo jirka, iwm.
2. Waxaa mamnuuc ah in dalka la soo geliyo cunto, sharaab, iyo waxkasta ay ku jirto halis caafimaad ee bulshada.
3. Marka la hubiyo in daawadu ama cuntadu dhacday waa la gubayaa, qofkii ama shirkaddii lagu qabtayna ama dalka soo geliseyna waxaa laga qaadayaa tallaabo sharciga waafaqsan.

## Qodobka 28-aad

## Xayeysiinta Daawada iyo Xirfadleyaasha Caafimaadka

1. Waxaa la mamnuucay xayeysiinta tooska ah ee ku saabsan aqoonta xirfadleyaasha caafimaadka iyo goobaha caafimaadka gaar ahaaneed haddii aan ogolaansho laga helin Guddiga Xirfadleyaasha Caafimaadka iyo Ansixinta Wasaaradda Caafimaadka.

## QODOBKA 29-aad

## BURRINTA XEERKAN

Waxaa la buriyey Xeer Kasta oo Ka hor imaanaya xeerkani.

## QODOBKA 30-aad

## DHAQANGELINTA

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyaan, Madaxweynaha DPL saxiixo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.

**Dr. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas**

**Madaxweynaha Dawladda Puntland.**